



European Union Naval Force Somalia
Operation Atalanta
www.eunavfor.eu

Ciidanka Bada ee Isbayn Waxay Xabsiga u Taxaabeen Somali Budcad-Badeednimo looga Shaki Qabo

24kii Oktoobar, 2012, meel 120 mayl-badeed u jirta jaseerada Soqodra dhineceda koonfur-galbeed ayuu markabka ESPS Castilla ee ciidanka bada ee Midawga Yurub ku xidhay lix Somali ah oo looga shaki qabo inay yihiin budcad-badbadeed, kuwaas oo lagu sheegay inay isku dayeen inay qabsadaan markabka kaluumaysiga ee FV Izurdia oo laga leeyahy Isbayn. In lagu wareejiyo Isbayn waxaa go'aamisay Maxkamada Dhexe ee Dambi-oogista ee n°3 ee Madrid.

Budhcad-badeedan laga shakiyay waxaa lagu saaray markabka ESPS Castill, diyaaradaha qumaatiga-u-kaca oo uu leeyahay markabka reer Holland ee loo yaqaan HNLMS Rotterdam oo watay calanka Hawlgalada Difaaca Bad-waynta ee Gaashaan-buurta NATO. Markabka HNLMS Rotterdam waxaa uu budhcad-badeedan laga shakiyay qabtay maalin ka dib weerar guuldaraystay oo lagu qaaday markabka FV Izurdia.

31kii Oktoobar, waxaa soo gaba-gaboobay hawlihii Isbayn loogu sii gudbin lahaa budhcad-badeedan laga shaki qabo, haatana waxay ku sii jeedaan maxkamad isbayn ku taala.